

POST HOLDINGS, INC.

# A Post For All

**OGOSTO 2022** | ARRINKA JIRA #1

**A Post For All** waxaa la bilaabay in lagu aqoonsado muhiimada ay leedahay kala duwanaanshaha, sinnaanta iyo ka mid noqoshada (DEI) ee guud ahaan shirkadeena. Waxqabadyadani waxay saameyn joogto ah ku yeesheen deegaankeena shaqada, dadkeena iyo natiijooyinkeena. Marka aan wadaagno macluumaadka ku saabsan hawlaha DEI ee guud ahaan bulshadayada Post, waxaan sidoo kale wax badan ka baranaa aqoonsigayada wadajirka ah iyo inaan sii wadno aqoonsiga iyo baabi'inta caqabadaha fursada. Hadafkayagu waa in barnaamijka **A Post For All** uu soo ifbixiyo muuqalka fursadahan ee goobaha oo dhan isla markaan ay dhiirigelin doono wax badan! Fadlan la wadaag ra'yi-celintaada iyo sheekooyinka la soo jeediyay ee arrimaha mustaqbalka mid ka mid ah hoggaamiyeyaasha golaha hoose.

*Hogaamiyayaasha Golaha Kala Duwanaanshaha, Sinaanta iyo Ka Mid Noqoshada Post*




**DALLAS CUPP**
Post Holdings
dallas.cupp@postholdings.com





**T.D. DIXON**
Post Consumer Brands
tkdixon@postholdings.com





**THYME HILL**
Bob Evans Farms
thyme.hill@bobevansfoods.com


## Hello / Bonjou oo ka socota Lima

Si la mid ah inta badan goobaha wax soo saarka, sanadkii 2021 Bob Evans Farms' Lima, Ohio, warshadu waxay la dhibtoonaysay heerarka isbedbeddelka sare ee qayb weyn ahaan ka dhashay masiibada COVID-19. Waagii hore, goobta Lima waxay isticmaali jirtay shirkado shaqaaleyn oo ku meelgaar ah oo waaweyn si ay u xalliyaan, badanaa ka dhalan jirey natiijooyin isku dhafan. Maamulka laanta shirkadda waxay caqabadaha cudurka safmareenka ah u isticmaaleen fursad ay ku sahamiyaan xalal shaqaale oo dheeraad ah.

Kooxda Bob Evans waxay isticmaaleen shirkad shaqaaleynta oo ay leeyihiin dadka laga tirada badan yahay ee deegaanka ee leh dhaqamada xeeladaysan ee soo saarista dad leh karti kala duwan. Si wada jir ah, Shirkadaha Bob Evans iyo hawlwadayaashooda cusub waxay keeneen in ka badan 80 shaqaale ah (~ 20% wadarta shaqaalaha ee jooga Lima) bilo gudahood, qaar badan oo khibrad hore u lahaa wax soo saarka. Dadka ku biiray shaqaalahan waxay u badnaayeen Creole, oo ka yimid Haiti, Dominican Republic iyo meelo kale oo ku yaala bariga Kariibiyaanka. In ka badan kala bar waxay ku hadlayeen wax yar Ingiriisi ah waxayna u baahnaayeen tarjumaad. Si taas looga gudbo, kooxdu waxay la shaqeysay hay'adda si ay u bixiso taageerada turjubaanka xilliyada shirarka iyo marka la joogo goobta wax soo saarka.

Natiijadii ka soo baxday iskaashigani waxa ay ka muuqatay hoos u dhac ku yimid heerarka jagooyinka furan iyo tirada hooseysa oo boosaska furan. Isbedelka shaqaalaha oo yaraaday ayaa gacan ka geystay kobcinta isku hallaynta shabakadda ee shirkadda. Waxaa ka sii muhiimsan, shaqaalihii Lima waxay soo dhaweeyeen dhaqanka asxaabtooda Creole waxayna kordhiyeen dareenkooda dhaqaneed iyo u furfurnaantooda ku aadan isbeddelka. Intaa waxaa dheer, caqabada luqadeed ayaa noqotay mid muhiim ah xaaladaha qaarkood, maadaama ay ku khasabtay qof walba inuu raadiyo habab cusub oo lagu wada xiriiro, wax lagu baro oo lagu tababarto.

*Iyada oo ku saleysan Columbus, Ohio, Bob Evans Farms ayaa leh ku dhawaad 1,300 shaqaale ah oo ku kala baahsan lix goobood.*

KU CUSUB POST CONSUMER BRANDS:

## Taxanaha Waxbarashada Allyship

Xagaagan iyo xilliga dayrta, Guddiga La-talinta ee Post Consumer Brands (PCB) DEI waxay martiqaadi doonaan dhammaan hoggaamiyeyaasha PCB si ay u dhammaystiraan **"Taxanaha Waxbarashada Allyship."** Mid ka mid ah waxyaabaha ahmiyadda la siiyo ayaa ahayd in la isku daro waxbarashada isbahaysiga iyo tababbarka PCB iyo kordhinta liiska agabkooda.

Nuxurka barnaamijka waxa Isbahaysiga Ganacsiga Minnesota ee Sinnaanta Jinsiga (MBCRE) ay siiyeen PCB. MBCRE waa isbahaysi ay ku midaysan yihiin in ka badan 80 urur oo fadhigoodu yahay Minnesota oo ay ka go'an tahay in ay agabyo iyo barnaamijyo u sameeyaan ururada si ay u taageeraan iyaga oo ujeedadoodu tahay in ay dhisaan deegaan loo wada siman yahay.

Tababarka laftiisa waxa uu bixiyaa waayo-aragnimo soo jiidasho leh, oo loogu talagalay bartayaasha iyada oo loo marayo laba qaybood:

- *Waxbarasho is-maamul ah: cutubyo tababar oo onlayn ah, oo qofka iskiisa u baranayo oo loogu talagalay inay bixiyaan tusaalayaal xaaladeed oo macquul ah iyo nuxur fiidiyow ah*
- *Fooramyada wada-hadalka: wada-hadalo khadka tooska ah, oo ka kooban kooxo yaryar oo ka kooban asxaabta kale*

Marka laga soo tago bixinta guudmarka ku saabsan macnaha iyo muhiimada isbahaysigu, tababarku wuxuu ujeedadiisu tahay in la abuuro faham isbahaysi oo dhex mara hoggaamiyeyaasha ururka. Marka sidaas la sameeynayo, madaxdu waxay awood u yeelan doonaan inay ku hawlanaadaan hab isla xisaabtan ku dheexan -- isbaysinimadu maaha kaliya wacyiga; waxay ku saabsan tahay isticmaalka wacyigaas si tallaabo loo qaado. Ilaa hadda, dhammaan hoggaamiyeyaasha fulinta, kooxaha HR-ka iyo xubnaha Guddiga PCB ee DEI ayaa dhammaystay taxanaha.

**Isbahaysigu waa xulafo noqosho—mid la xiriira oo taageera koox aanu ka tirsanayn. Erayga waxaa inta badan lagu tilmaamaa maqaamka qofka si firfircoon ugu ololeeya koox la haybsooco in laga soo qeybgeliyo bulshada, uuna keli ku yahay, daacadna ka tahay halganka iyo aragtida.**



**MAHLIA MATSCH,**
**Hoggaamiyaha Guddida DEI ee PCB, ayaa bixiyay jawaab celin hore iyo falcelinta tababarka.**

*Post Consumer Brands waxay xarunteedu tahay Lakeville, Minnesota, waxayna leedahay ku dhawaad 3,400 oo shaqaale ah oo ku kala baahsan 16 goobood oo Maraykanka iyo Kanada ah.*

**Maxay ahaayeen falcelinta iyo ra'yi celinta ka dhashay tababarka?**

> *Jawaab-celinta aan ka helnay tababbarka isbahaysiga ayaa ahaa mid aad u wanaagsan. In kasta oo isbahaysigu uu fikrad cusub u yahay qaar badan oo naga mid ah, hoggaamiyayaasheenu waxay dib u milicsadeen waayo-aragnimadooda shakhsi ahaaneed waxayna baranayaan waxa uu yahay isbahaysigu ficil ahaan. Fooramyada doodaha ee ka dambeeya cutubyada waxbarasho ee is-maamulka ah ayaa ahaa hab wanaagsan oo ay hoggaamiyeyaashu ku xiriiri karaan, ku wadaagi karaan aragtidooda isla markaana ay uga doodi karaan su'aalaha iyagoo sameeynaya koox yar ka kooban asaagooda.*

**Sidee buu tababarka isbahaysigu u taageeraa shaqada Guddiga La-talinta oo uu saamayn ugu yeeshaa yoolalka DEI?**

> *Ilaha isbahaysiga iyo waxbarashada waxaa loogu talagalay in kor loogu qaado wacyiga ku aadan sida mid kasta oo naga mid ah uu xulafo ula noqon karo dadka kale. Waxaan hawsha la bilownay hogaamiyayaasha sabab la xiriirta doorka muhiimka ah ee ay ka ciyaaraan gacan ka gaysashada dhisidda dhaqan loo wada dhan yahay halkaas oo dhammaan codka xubnaha kooxda la maqlayo lana qiimaynayo.*

AALADA ZOOM UGA WADA XIRIIRISTA WEETABIX:

## Gargaarka Degdegga ah ee Caafimaadka Maskaxda



*Waxaa diyaarisay Katie Lines*

Weetabix, shaqadayada kaqeybgelinta bulshada waxaa xuddun u ahaa isgaarsiinta --in la hubinayo inaan fahamnay baahiyaha dadkeena, iyo sidoo kale ku taageeridda shaqaalaha wixii agabyo ah iyo in la siiyo meel ay ku hadlaan. Barnaamijka Weetabix, **"Ka mid Noqoshada Aan Qofna Ka Reebanayn"** waxaa la abuuray saddex sano ka hor iyadoo taageero laga helayo la-taliyeyaasha kala duwanaanshaha, sinnaanta iyo ka mid noqoshada, si loo abuuro jawi ammaan ah oo loogu talagalay wada-hadallada caafimaadka maskaxda - halkaas oo shakhsiyaadka soo gudbin karaa wixii walaac ah oo ay qabaan, ugu dabaaldegi karaan guulahooda, wax ku bari karaan xubnaha kooxda isla markaana sii horumarin karaan dhaqankeena. Waxaan dhawaan ballaarinay saameynta barnaamijkeena wuxuuna ka kooban yahay waxqabadyo kala duwan oo ay ku jiraan kal-fadhiyo gudaha shirkadda ah, tababarka ay bixiyaan qollooyin saddexaad iyo habdhaqanka dib u eegista joogtada ah si loo yareeyo eexda aan ula kaca ahayn ee ka dhaca goobta shaqada.

Sannadkan, waxaanu iskaashi la samaynay barnaamijka **Gargaarka Degdegga ah ee Caafimaadka Maskaxda** (**MHFA**) ee Gudaha England si aanu uga qayb galno koorso laba maalmood ah. Koorsada MHFA waxay ka kooban tahay mowduucyo badan oo kala duwan: ka hortagga ismiidaaminta, niyad-jabka, weerarada argagaxa iyo welwelka, iyo sidoo kale sida loo aqoonsado astaamaha dhibaatada caafimaadka dhimirka iyo sida ugu wanaagsan ee loo caawin karo qof la soo ifbaxaya ama leh taariikhda dhibaatooyinkan.

Waxaa ii caddaaday, maadaama aan ahaa qof ka mid ah kooxdii ugu horreysay ee dhammaysay tababarka, waxay ahayd in xubin kasta oo kooxda ka mid ahi ay dib u milicsan karaan markii iyaga, ama qof ay jecel yihiin, ay la kulmeen caqabado xagga caafimaadka maskaxda ah. Waxa sidoo kale si farxad leh u muuqday ayaa ahaa dadaalkayada wadajirka ah ee aan ku caawinayno dadka kale iyo aqoonsiga ah in ficilladeennu ay samayn karaan isbeddel weyn.

Weetabix waxa soo maray laba kooxood oo mutadawiciin ah, oo dhamaantood ay noqdeen "Kaaliyayaasha Gargaarka Degdegga ee Caafimaadka Maskaxda" - iyadoo taariikho tababar oo dheeraad ah ay qorshaysan yihiin. Hadda waxaan haynaa 27 MHFA-yo. Waxaan u mahadcelineynaa oo aan aqoonsannahay kuwa aadka ugu dhiirranaa inay kooxaha la wadaagaan khibradahooda intii ay ku jireen tababarkooda - matalaad dhab ah oo ku aadan qayamka "tusaale u noqo dadka aad hogaaminayso" ee Weetabix. Marka xubnaha kooxdu ay wadaageen sheekadooda, waxa ay dhiirigelisay in xubnaha kooxda ay milicsi ku sameeyaan sida ka warqab la'aantooda xagga caafimaadka dhimirka ay u saamaysay iyaga, asxaabtooda, qoyskooda iyo saaxibadooda. Ficilkoodu waa wax lagu farxo.

Waxaan barannay inaan wax weyn ka bedeli karno kooxaheenna annagoo waqti ku bixinayna inaan la xaal wareysano asxaabta, annagoo weydiinayna sida ay dareemayaan iyo annagoo u siinayna taageero siyaabo yaryar. Waan ku faraxsanahay waana ku faanaa shaqada aan qabanay ilaa hadda, laakiin waxaan aqoonsannahay in aan wali ku jirno safarkayaga. Waxaan sii wadi doonaa in aan mudnaanta siino barnaamijka ah "Ka Mid Noqoshada Bulshada Iyadoon Qofna Laga Reebin." MHFA, waxay na bartay in la xiriirida dadka kale ay samayn karto isbedel.

"Waxaan barannay inaan wax weyn ka bedeli karno kooxaheenna annagoo waqti ku bixinayna inaan la xaal wareysano asxaabta, annagoo weydiinayna sida ay dareemayaan iyo annagoo u siinayna taageero siyaabo yaryar. Waan ku faraxsanahay waana ku faanaa shaqada aan qabanay ilaa hadda, laakiin waxaan aqoonsannahay in aan wali ku jirno safarkayaga.

*Katie Lines waa Khabiir Mawduuceed oo ku takhasustay Wax soo saarka Weetabix, MHFA oo ka socda Kooxda 1 waana Xubin Ka Tirsan Kooxda Hogaaminta. Weetabix waxay xarunteedu tahay Burton Latimer, United Kingdom, waxayna leedahay ku dhawaad 1,017 shaqaale saddex goobood.*

MICHAEL FOODS:

## Hoggaaminta Qeybta Cuntadu waxay ka dhigan Kow ka Noqoshada Dadka

Kooxda hogaaminta ee Michael Foods waxay diiradda saarayaan abuurista khibrad shaqaale oo wanaagsan - inay xoojiyaan dhaqankooda goobta shaqada iyo inay kordhiyaan ka qaybgalka iyo sii haynta shaqaalaha. Aqoonsiga in xiriirka xooggani uu dhaafsiisan yahay waxa aan samayno inta lagu jiro maalinta shaqada, hoggaamiyayaashu waxay dadka la wadaagaan wax badan oo ku saabsan naftooda shakhsi ahaaneed.

Hogaamiyayaasha jooga dhamaan goobaha Michael Foods waxay diyaariyeen macluumaad ku saabsan taariikhdooda si ay ula wadaagaan kooxahooda, oo ay ku jiraan macluumaadka ku saabsan qoyskooda, kooxaha isboortiga ee ay jecel yihiin, taariikhda shaqada iyo waxbarashada iyo cuntooyinka ay jecel yihiin. "In aan wax badan oo aniga igu saabsan la wadaago xubnaha kooxdayda waxay furtay sababo ay dadku iigula hadlaan in badan, taas oo keeneysa kalsoonida iyo rabitaanka ah inaan ka wada hadalno sidoo kale shaqada," ayuu yiri Terry Perreira , Agaasimaha Sare, Maamulka Shaqada iyo Shaqaalaha.

Shaqaaluhu waxaa ay sidoo kale ku wadaagayeen dhaqankooda iyaga u marayay cuntada qadada. Cunto karinta iyo wada cunista cuntada waxay noqon kartaa muujinta aqoonsiga dhaqameed, iyo sidoo kale nafaqeynta jirka iyo ruuxa labadaba. Qadada ayaa ka dhacda meelo badan oo ka tirsan shabakada Michael Foods. Michael Foods 'Elizabeth, New Jersey, oo ah meesha laga soo saaro ukunta sida adag loo kariyey iyo kuwa la dubay, shaqaaluhu waxay keeneen noocyo kala duwan oo cunto dhaqameed ah oo ay jecel yihiin. Buffet-ka waxaa ku jiray humitas (Ecuador), yuca con chicharron tipico iyo pupusas (El Salvador), empanadas (Columbia), plantain (Jamaica), krokiety (Poland), mangú (Jamhuuriyadda Dominika), pita (Bosnia), tamales (Mexico) iyo pao doce (Portugal). Qadada dheeriga ayaa aad caan ugu ahaa shaqaalaha; waxay dhiirigaliyeen ku faanida dhaqanka waxayna xoojiyeen dareenka laga qabo ka mid noqoshada bulshada.

*Michael Foods waxa uu leeyahay ku dhawaad 3,984 shaqaale ah oo ku kala sugan 29 goobood.*










# 8 Su'aalood

## oo leh Charles Sargent, Maareeyaha Laanta, Cuntada iyo Adeegyada 8th Avenue

**Maxay yihiin mas'uuliyaddaha ugu weyn ee shaqadaada oo intee in le'eg ayaad joogtay 8th Avenue?**

*Waxaan imid 8th Avenue markay ahayd Agoosto 2021 si aan uga bilaabo goob cusub. [8th Avenue waxay laanteeda Burnaby, Canada, u rartay Hazelwood, Missouri, dabayaaqadii 2021.] Waxaan qabtay shaqada noocan oo kale ah waagii hore oo runtii aad ayaan ugu raaxaystaa in aan abuuro goob cusub iyo qorshe 3-5 sano ah si aan u arko dhammaan waxa soo ifbaxa. Waxaan isu keenaynaa R&D, hawlgallada, badbaadada, tayada iyo HR-ka si aan qaab-dhismeedka ugu meelayno meel kasta – annagoo macaamiilkeena No. 1, Whole Foods, ka dhigeyna mid faraxsan inta lagu jiro kala-guurkan muhiimka ah.*

**Xagee ku soo kortay?**

*Waxaan ku soo koray East St. Louis, Illinois, oo inta badan qoyskaygu waxay ku nool yihiin aagga St. Louis. Waxaan uga soo tagay si aan u aado kulliyad ka dibna waxaan ka soo shaqeeyay ciidamada badda iyo Proctor & Gamble (P&G), Nestle iyo McCormick Spices ayaa meelo kale i geeyey. Laakin maadaama wiilasheenna ay ku nool yihiin aagga St. Louis oo hadda ah wiilkayagii ugu horreeyay ee aan awoowaha u ahay, xaaskaygu aad bay ugu faraxsan tahay inaan guriga ku soo laabanno.*

**Waa maxay qaybta ugu fiican ee shaqadaada?**

*Marka laga reebo abuurista xaruntan cusub, in la arko dadka cusub oo isu imanaya iyo abuurista kooxdan ayaa ugu fiican. Horumarinta dhaqanka ka mid noqoshada waa muhiim. Waxaan dooneynaa inaan waqti badan ku wada qaadano warshadeena, sidaa darteed ku raaxaysigeeda waa muuqaalka ugu fiican ee aan rabo inay dhacdo. Haddii la helo dhaqanka saxda ah, waxaan gaari karnaa yool kasta.*

**Waa maxay sababta kala duwanaanshuhu muhiim kuugu yahay?**

*Kooxaha ugu kala duwanaanshaha badan waa kooxaha ugu guulaha badan. Arrintaan waxaan soo arkay intii aan ku soo guda jiray xirfadayda. Marka ay isu yimaadaan dad ka soo kala jeeda asal kala duwan, dhaqamo, hab-feker iyo waayo-aragnimo kala duwan oo aad midba midka kale isugu soo jeediso sida ugu wanaagsan - waxaad yeelan doontaa koox waxqabad sare leh.*

**Sideed u kobcin kartaa ka mid noqoshada? Maxaad u malaynaysaa inay tahay sifada ugu muhiimsan ee lahaan karo hogaamiye kaqeybgelinta?**

*Tababarkii hore ee P&G, waxay i bareen shay igu dhegay intii aan ku jirey xirfadayda oo dhan —akoon bangi oo shucuureed lala samaysto dadka kale. Tani waxay ka dhigan tahay inaad dhisto xiriirro oo aad ku kobciso isdhexgalkaaga maalinlaha ah; Muddo ka dib marka cilaaqaadyadaasi ay kobcaan, waxaa laga yaabaa inaad bixin karto jawaab celin iyo tababar horumarineed. Laakiin maadaama aad dhigaal ku ridatay waxyaabaha togan, haddii ay tahay inaad sameyso 'ka-noqosho' oo aad la soo baxdo wax taban, ma dhamayn kartid akoonkaas bangiga. Waa inaad samaysaa is-dhexgal togan maalin kasta. Waxaad la yaabi doontaa waxa ay dhihitaanka 'mahadsanid' ama muujinta calaamadaha qadarin ay uga dhigan yihiin dadka. Aqoonsiga waxyaabaha yaryar iyo u mahadcelinta qof ayaa wax weyn ka tari karta farxadooda. Dadku shirkadaha kama tagaan, dadku waxay ka tagaan dad. Hadii aanad haysan hogaamiyayaal si naxariis iyo taxadar leh u hogaamiya dadka, ma dhisi doontid dhaqanka aad rabto.*

**Waa maxay alaabta aad ugu jeceshahay ee Post?**

*Whole Foods 365 Deluxe Trail Mix*






# LAMBARADA

## WAXYAABAHA AY KA KOOBAN TAHAY

**Bisha mutadawacnimada shirkadda oo dhan ah ee Post Consumer Brands**

**30,000+**

**cunto ah ayaa deeq ahaan loo bixiyey**

Post Consumer Brands ayaa si sharaf leh u bilaabay barnaamijka sanadlaha ah ee ugu horeeyey ee mutadawacnimada bisha oo dhan ah ee "Ingredients For Good" ee Abriil 2022. Ku dhawaad 500 oo xubnood oo ka tirsan kooxda oo dhan ayaa ka qaybqaatay, iyaga oo shaqeynayay in ka badan 700 saacadood oo mutadawacnimo ah, oo 30,000+ cunto ah ayaa la bixiyay ama la baakad gareeyey.

### Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu fadhi ka helo miiska.

*Cuntadu waa lama huraan. Waxay nafaqaysaa jirkeena. Maskaxdeena ayay shidaal ku shubtaa. Iyada oo aan loo eegin asalkayaga, cuntadu way ina mideysaa oo waxay nagu xiriirisaa qoysaskeena iyo asxaabtayada. Haddana dad badan ayaa ku dhibtooda inay cunto ku filan miiska usoo saaraan qoyskooda. In ka badan 38 milyan oo qof oo ku nool Maraykanka, oo ay ku jiraan 12 milyan oo carruur ah, ayaan haysan cunto ku filan. Kanada gudaheeda, ku dhawaad hal ka mid ah toddobadii qofba (14.6 boqolkiiba dadweynaha ku nool wadanka) ayaa lagu qiyaasaa inay ku nool yihiin qoysas cunto-yeri ka dhex jirto. Labada waddanba, haqab-beel la'aanta cuntadu waxay si aan xad lahayn u saamaysaa qoysaska iyo shakhsiyaadka midabka leh, oo ay ku jiraan dadka madowga iyo dadka asaliga ah.**

## QUUDINTA ST. LOUIS

**Mutadawacnimada shaqaalaha shirkadaha Post Holdings, baakadaynta baakado cunto ah**

**100s**

**Sanduuqyo ah ayaa la baakad gareeyey**

Sannadkii 2020, Post Holdings waxay aqoonsatay saamaynta ba'an ee masiibada cudurka safmareenka ah uu ku yeeshay haqab-beelka cuntada waxayna deeq gaar ah u dirtay Operation Food Search (OFS) ee St. Louis. OFS waa hay'adda gargaarka gaajada madax-bannaan ee ugu weyn gobolka, iyadoo aduunka ku qaybinaysa cunto qiimaheeda dhan $33 milyan sannadka 2021-ka. Post Holdings waxay sii wadaa inay bixiso taageerada maaliyadeed ee dadaallada ballaaran ee OFS iyo, marka laga reebo maalgelinta, waxay sidoo kale iskaashi la samaysaa shaqaalaha shirkadaha ee mutadawiciinta ah. Bishii hore, xafiiska St. Louis wuxuu qabtay barnaamijka 'food drive' oo 29 mutadawiciin ah ayaa bakhaarka OFS ku baakad gareeyey sanduuqyo cunto ah oo loogu talagalay wakaaladaha iyo qoysaska u baahan.

"Operation Food Search wuxuu caawiyaa dad badan oo bulshadeena ka mid ah," ayuu yiri Rob Vitale, madaxweynaha iyo maamulaha Post Holdings. "Waan uga mahadcelineynaa shaqadooda, waxaana ku faraxsanahay inaan sii wadno taageerida hadafka ururka."

"Post Holdings, iyada oo loo marayo hadiyaddooda la cusboonaysiiyey iyo saacadaha mutadawacnimada, waxay muujinayaan kalsoonida ay ku qabaan awoodda OFS si ay saameyn dhab ah ugu yeeshaan bulshada," ayuu yiri Kristen Wild, agaasimaha fulinta ee OFS. "Aad ayaan uga mahadcelinaynaa taageeradooda."

*Xafiiska shirkada Post Holdings waxay xarunteedu tahay St. Louis, Missouri, waxaana ka shaqeeya ku dhawaad 173 shaqaale.*

## DEEQAHA AWOOD-SIINTA BISHA TAARIIKHDA DADKA MADOW

**Post Consumer Brands waxay hogaaminaysaa barnaamijka deeqaha**

**$5,000**

**oo deeqo ah oo loogu talagalay ururo maxalli ah oo aan macaash doon ahayn**

Si loo xuso Bisha Taariikhda Dadka Madow ee sanadkan, Tiirka Bulshada ee Guddiga La-talinta DEI ee PCB ayaa qoondeeyay $1,000 deeq ah si loo taageero loona xoojiyo ururada maxaliga ah, ee dadka madow kuwaas oo aan macaash doonka ahayn.

Dadka deeqda helay waxaa ka mid ahaa:

- Gracious Homes Inc.
- 102.5 FM KLEK Radio
- Black Wall Street Reno
- EMERGE Minnesota
- Athletics United

Hal xubin oo ka tirsan kooxda PCB, Gary Williams, ayaa si fiican u dhigay: "Bisha Taariikhda Dadka Madoow waa fursad lagu sahamiyo oo aan ku muujino dadka, halganka iyo dhibaatooyinka ay dadka kale ee naga horeeyey ay soo samreen. Inta badan taariikhdaas way luntay, way qarsan tahay maadaama la qarinaayay sannado badan. Waa aqoonsiga iyo kor u qaadida taariikhdan mida u oggolaan karta dadka midabka leh inay ka gudbaan cabsida, kalsoonida iyo fikradaha khaldan ee bulshada Maraykanku ay kobcisay."



*Xigashooyinka: USDA; Xarumaha Cunnada Bulshada ee Kanada; Quudinta Ameerika; Cilmi-baarista Siyaasadda Haqab-beelka Cuntada PROOF